



# Hagaha...

## Qoridda ‘Sheekadaada’

Nolosheena iyo waxyaabaha aan soo marno waxay yihiin ilo wayn ee sheeko laga qori karo. Qof walba buug ayaa laga qori karaa, waxaana aaminsanahay in qof walba sheeko noloshiisa ku saabsan laga sheegi karo. Sidoo kale haddii uu noloshaada ahaa mid waayo aragnimo badan leh, sheekada aad qori doontid ayaa sii fiicnaan doono! Sidaas awgeed ha ka wel-welin haddii aad muddo dheer wax qorin. Sheekadaada wuu u qalmaa!

### WAX YAR KA BILOW

Markii aad rabtid inaad noloshaada sheeko ka qortid, wax yar ka bilow. Marka koowaad qor waxyaabaha aad ka xasuusato dhacdooyinka aad soo martey, ka dibna sheekada ka soo bixi doono eeg:

- Marka koowaad ee aad qof shumisey
- Sanadguuryo xasuus leh – kaaga, ama xaflad aad tegtay, matalan
- Wax aad si cad uga xasuusato markii aad 5 jir eheed
- Dhalashada cunuggaaga
- Maalintaada koowaad ee shaqada
- Yunifoom aad mar gashatey, ha ahaado mid aad u xiratey shaqo, dugsi ama hawl aad qabatey
- Mar uu qof si badan kaa qosolsiiyey
- Safar aan la hilmaami karin.

### NOLOL DHAB AMA SHEEKO KHAYAALI

Xasuuso inkasto aad tahay qofka sheekada qoraaya, waxaad isticmaali kartaa xasuustaada iyo sheekoyin khayaali ah markii aad noloshaada wax ka qoreysid. Dadka wax qora badankooda waxay kuu sheegi doonaan inay dib u eegaan waayo-aragnimada noloshooda iyo fikrad ka helaan, xittaa haddii aysan ayaga laftigooda ama dhacdaadaas gaar ahaan wax ka qoreynin.

Sidaas awgeed wax ka qoridda noloshaada waa hab fiican ee lagu tababarto si loo qoro sheekoyinka khayaaliga ah, sababtoo ah wuxuu laylinaaya xasuustaada iyo wuxuu kugu xiriirinaaya shucuurtaada.

### ARUURINTA MACLUUMAADKA

Meel fiican ee aad ka bilaabi karto inaad ka aruuriso sheekoyinka noloshaada, ama sheekoyin gaaban waa buugga masawiradaada, xasuus-qoryada, sanduuqyada xasuusta, buugaagta aad wax ku qortey: wixii aad haysaba. Hal haweeney waxay weligeedaba qori jirtey xasuus-qor nolosheeda oo dhan iyo sidoo kale sawiro ayeey sameyn jirtey. Iminka waxay rabtaa inay qorto sheekada nolosheeda iyo inay isku keento – sheekada iyo sawirada – si ay ugu gudbiso carruurta ay ayeeyo u tahay. Wuxuu noqon doonaa qorshe wayn markuu dhamaado, waxayna qabtaa waxyaabo badan oo ay isticmaasho sidii ay hawshaas u qabato.

Eeg buugga masawiradaada, xasuus-qoryadaada, warqado, iyo eeg xasuusyada ay kugu dhalinaayaan. Miyaad hilmaamtey inay waxyaabo dheceen? Miyeeey sawiradaan ama warqadahaan dib kuu soo xasuusiyeen dhacdooyinkaas? Waxaa suurtoagal ah inaad hesho sheeko aadan ogeen. Warqado ka dhexeyo ayeeyo iyo walaasheeda waxay muujin karaan inay dooden markii ay u guurtey dal kale. Taa waa sheeko xiiso leh!

### NOLOSHAADA OO DHAN

Fikradda inaad qorto wax ku saabsan noloshaada oo dhan wuu ku cabsi gelin karaa. Wax badan ayaa ku jiro! Halkee ka bilaabi kartaa? Miyaad ka bilaabtaa dhalashadeyda iyo miyaad halkaas ka wadaa sheekada sida Charles Dickens

markii uu qoray *David Copperfield*, ama miyaad qortaa sheekoyin kala qaybsan ee ku saabsan waqtiyo kala duwan ee noloshaada adigana wax kaa sheegayaa?

Liiska aan soo qorney wuxuu ku siin doonaa fikrado ku saabsan 'cutubyada' kaladuwan. Waxaa xittaa suurtoagal ah in markii aad bilowdo inaad wax ka qorto hal dhacdo, aad xasuusato wax kale. Sidaas ha u dhaco, u fasax xasuustaada inuu soo baxo.

Haddii kale, waxaad go'aan ka gaari kartaa inaad qorto dareemkaaga waqti gaar ah, intii aad dhacdooyinka dib uga sheekeen leheed. Tusaaleynta mawduucyadaan oo kale waxay yihiin:

- Geesinimo markii uu dhib ku soo marey – sheekadaada ama xubin ka mid ah qoyskaaga markii aad la kullanteen dhacdo dhib ah
- Jeceyl fiican – sheeko ku saabsan shukaansi ama xiriir lammaano, waxaad qori kartaa waxyaabaha fiican ama xun ee aad kala kullantey
- Waqti sharaf leh – sheeko ku saabsan wax aad sharaf ka tahay
- Riyoyin – maxay ahaan jireen riyoyinka carruurnimadaada? Waa maxay riyadaada iminka.

### **LAGU XIREY SHUMIS**

Haddii aad warqad isku dirto markii aad tahay 18 jir, 30 jir ama 45 jir, maxaad ku qori leheed?

Xasuuso wixii aad rabtey markii aad da'daas eheed, iyo wixii aad samayn jirtey. Warqad fiican isku qor. Isku qor (da' walba aad xulato) sida aad iminka tahay, sida ay noloshaada iminka tahay. Qofkaaga dhallinyarada ah talo sii. U sheeg laftigaaga markii aad dhallinyaro eheed wixii aad baratey, ama rajeynayso inaad waqtigaas sameyso. Waad ka yaabi doontaa wixii aad qori doonto!

### **QAABEYNTA SHEEKADAADA**

Kadib markii aad qaybo yar-yar ka qorto noloshaada, waxaad arki kartaa inay jiraan dhacdooyin gaar ah uu qoraalkaaga diiradda saarey, ama dareen ama mawduucyo gaar ah. Qoraalladaan iyo sheekoyinka waxay kugu caawin doonaan helidda qaab aad ku qorto sheeko ka dheer, haddii aad rabtid inaad mid qorto. Qaar ka mid ah fikradaha waa:

- Waxaad noloshaada jeceylka ka heli kartaa shan waxyaabood oo muhiim ah – qor sheekada sida ay isku xirmaan, ama sida markii laysku xiro aanan la garan karin!
- Sheekada noloshaada sida ay ugu qoran yihiin warqadaha. Go'aan ka gaar inaad warqad qorto xilli muhiim ah ee noloshaada – tusaale ahaan markii uu da'daada yahay 10,15, 20, 25, 30... Warqadaha waxaad ku toosin kartaa dad kala duwan, laakin waxay ku hadli doonaan codkaaga markii aad da'da jirtey waxayna sheegi doonaan wel-welada iyo faraxsanaanta aad qabtey.
- Isticmaal cinwaan sida 'Waxa aan bartey' sheekada noloshaadana ka qor waxyaabaha aad ka baratey – laftigaaga, dunida. Qaybta labaad ee sheekada wuxuu ahaan karaa 'Waxyaabaha aadan baranin'.
- Qor tobanka wada-hadal ee muhiim ka ahaa noloshaada, ha ahaadano kuwo fiican ama xun. Si faah-faahsan u qor, iyo waxa aad adiga iyo qofta kale sheegteen iyo ka fikirteen markii aad hadasheen/doodeen/dabbaal-degteen/qorsheyseen mustaqbalka.
- Hel toban sawiro ee muhiim kuu ah iyo dhacdo muhiim ah ka muujinaayo noloshaada. Qor waxii waqtigaas dhacaayey markii sawirka la sameeyey.

Ugu dambeystii – ku raaxeyso wax qoridda, iyo dib u helidda sheekoyinkaaga. Waxaa maskaxdaada ku jiro maktabad buuxda. Bilow inaad qalinkaas isticmaasho!